# Isku dhafka Xeerka Xuquuqda Daryeelka Guriga ee Gobolka iyo Fadaraalka ee Macaamiisha La Kaalmeeyo

## Bayaanka Xuquuqaha

Macmiilka hela adeegyada daryeelka guriga ee kamida bulshada wuxuu leeyahay xuquuqahan iyadoo adeeg bixiyuhu ay tahay in uu siiyo xuquuqahan soo socda:

*Daaryeel-bixiye waa Waakalad La-ansixiyey oo Daryeelka Caafimaadka Guriga ah (HHA)

*Macmiilka waxa looga jeedaa Bukaan

1. **Daryeel bixiyuhu waa inuu bixiyaa macluumaad ku qoran** luuqad waadixa **oo ku sahansab xuquuqaha inta lagu jiro booqashada koobaad, iyo marka horeba daryeel-bixiyaha siinaya daryeelka macmiilka. Qoraalku waa inuu noqdaa mid ay fahmi karaan dadka aan lahayn Inigiriisi ku filan waana in ay helaan karaan shakhsiyaadka leh naafadu,** oo ay ku jiraan waxa la sameeyo hadii xuquuqdaada lagu tunto.
2. **Daryeel-bixiyuhu waa bixiyaa xogta laga xidhiidhayo maamulaha daryeel bixiyaha, oo ay ka mid yihiin magaca maamulaha, cinwaanka ganacsi, lambarka tilifoonka ganacsi si uu u helo cabashooyinka.**
3. **Adeeg-bixiyuhu waa inuu ku bixiyaa ogeysiis hadal ah xuquuqda iyo masuuliyadaha macmiilka luuqada koobaad ee shakhsiga ama luuqada uu dorbidaayo iyo habka shakhsigu fahmaayo, bilaash ah, iyadoo la isticmaalayo turjumaan awood u leh haday daruuri noqoto.**
4. Hel daryeel iyo adeegyo iyadoo loo eegayo qorshe ku haboon iyo waqti ku sargo'an, iyadoo ku xiran daryeel caafimaad oo la aqbalay, heerar caafimaad ama kalkaalinimo iyo xarumaha daryeelka dadka, uga qayb qaadashada si firfircoon horumarintiisa, wax kabadalkiisa, iyo qiimaynta qorshaha iyo adeegyada.
5. Ha laguu sheego ka hor intaadan helin adeegyada iyo shuruudaha aad **kaga qayb qaadanayso, waa in lagu ogeysiiyaa, ogolaanshaha ama diidida daryeelka iyo inta lagu gudo jiro daawaynta, iyadoo loo eegayo:**
    - Xulashooyinka kale ee la helayo ee wax ka qabanaya baahiyaha daryeelka guriga iyo cawaaqibta ka dhalanaysa diiditaanka adeegyadan.
    - **Dhamaystirka dhamaan qiimaynada.**
    - **Bixinta daryeel la qalabeeyey, iyadoo lagu salaynayo qiimaynta dhamayska tiran.**
    - **Aasaasida iyo dib u habeynta qorshaha daryeelka.**
    - **Anshaxiyaadka lagu qalabayn doono daryeelka.**
    - **Tirada booqashooyinka**
    - **Natiijooyinka la filayo ee daryeelka, oo ay ku jiraan yoolalka la aqoonsaday ee macmiilka, iyo khataraha iyo faa'iidooyinka la filayo.**
    - **Qodob kasta oo saamayn kara waxtarka daawada**
    - Isbedel kasta waa lagu qalabayn doona goobta daryeelka.

6. Waxa hore laguugu sii bandhigay isbedelada uu soo jeediyo bixiyaha adeega qorshuhu iyo in aad uga qayb qaadato si firfircoon go'aamada ku saabsan isbedelada adeega qorshaha.
7. **Hel dhamaan adeegyada ku xusan qorshaha daryeelka.**
8. Diid adeeg ama daawayn
9. Ogow, ka hor inta aadan helin adeegyada ama inta lagu gudo jiro booqashada koowaad, Xadidaadaha ku yimaada adeegyada bixiyaha daryeelka guri.
10. Waa in laguu sheegay, ka hor inta aan la bilaabin adeegyada, qiimaha lagaa qaadayo adeegyada; lacag intee leeg ayaad ka bixin doonta caymiska caafimaadka, barnaamijyada dadweynaha ama kuwo kale ee ay kamidka yihiin **Barnaamijka caymiska federaalka dadka waa weyn iyo caymiska caafimaadka dadka u baahan gacan qabashada, ama maalgalinada kale ee federaalka ama Barnaamijka kaalmada federaalka ee uu yaqaano adeeg bixiyuhu,** hadii uu garanayo; lacagta uu bixinayo macmiilku, iyo **isbedel kasta** oo khuseeya **macluumaadka lacag bixinta sida ugu dhaqsaha badan, ka hor inta aanu booqon bixiyaha adeega ku xiga.**
11. Ogow inay jiri karaan adeegyo kale oo laga heli karo bulshada, oo ay ku jiraan adeegyada daryeelka guriga iyo bixiyayaashooda, oo ogow halka laga helo macluumaad ku saabsan adeegyadan.
12. Si xor ah u dooro bixiyayaasha la helayo iyo isbedelka bixiyayaasha kadib markuu adeego bilaabmo, iyadoo la eegayo xadayta caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka mudada dheer, caawimaada caafimaadka ama barnaamijyada kale ee caafimaadka, ama barnaamijyada dadweynaha.
13. Waxaa lagu hayaa macluumaadka caafimaad, dhaqaale iyo shaqsiyeed ba si qarsoodi ah, waxaana lala tashaday bixiyayaasha siyaasadda iyadoo loo eegayo siidaynta macluumaadkan, **iyadoo ay ku jirto Dhigida Qiimaynta iyo Natiijada Macluumaadka (OASIS) ogeysiinta ilaalinta dhamaan macaamiisha ay xogta ka uruurisay OASIS.**
14. Helitaanka kaydka iyo xogta qoran ee macmiilka ee kaydkaasi iyadoo la raacayo Xeerka Kaydka Caafimaadka Minnesota, Sharciga Minnesota, Qeybtiisa 144.291 ilaa 144.298.
15. Waxa kuu adeegi doona dad si sax ah loo tababaray oo carbisan inay gutaan waajibadkooda.
16. Waxay kuula dhaqmi doonan si xushmad iyo qadarin leh, iyadoo xushmad loo muujinayo hantida macmiilka.
17. Iyadoo aysan jirin aflagaado afeed, maskaxeed, jinsiyeed iyo midab toona, **oo ay ku jiraan dhaawacyada aan la garanayn haybtooda,** dayacaada, dhiigmirashada dhaqaaleed**/lunsashada hanti,** iyo dhamaan noocyada kala duwan ee ku xumayn ah waxaa lagu daboolaya Xeerka u Nuglaanshaha Dadka waaweyn iyo Xeerka Ku Xumaynta.
18. Caqli gal ah, ogeysiiska hore ah oo la xiriira isbedelada adeegyada ama lacag bixinta, **iyadoo lagu faahfaahinayo adeegyada lagu qalabeeyey, hadii adeeg bixiyuhu uu rumaysan yahay inuu daryeelku daboolayn adeegaas, adeeg bixiyuhu uu yareeyo ama meesha ka saaro daryeelkii socday.**
19. Ogow sababta adeeg bixiyuhu u tirtiro adeegyada.

20. **Ogeysiinta bixiyayaasha qaabeeya siyaada wixii wareejin iyo fasixid ah, luuqaad uu macmiilku fahmi karo, oo ay heli karaan dadka laxaadka naafada ka ah, 4 cisho gudahood oo ah maalmaha la shaqeeyo ee bilawga qiimaynta booqashada. Bixiyaha adeegu wuxuu wareejin doona ama fasixi karaa macmiilka hadii:**
    - **Wareejinta ama fasixidu waxay muhiim u tahay badqabka macmiilka maxaa yeelay adeeg bixiyaha iyo dhaqtarka masuulka ka ah qorshaha daryeelka ayaa isku waafaqa in bixiyuhu aanu dabooli karayn baahiyaha macmiilka, iyadoo la eegayo awooda macmiilka. Bixiyaha adeegu waa inuu nidaamiyaa wareejin haboon oo amaan ah xarumaha kale ee daryeelka marka baahida macmiilku ay ka badato awooda adeeg bixiyaha;**
    - **Macmiilku ama lacag bixiyuhu kama bixin doono wax lacag ah adeegyada loo qabtay;**
    - **Wareejinta ama fasixidu waa munaasab hadii dhaqtarka masuulka ah qorshaha daryeelka iyo adeeg bixiyuhu isku waafaqaan in hadafyadii iyo yoolashii la dajiyay bilawga qorshaha daryeelka la gaaray, adeeg bixiyaha iyo dhaqtarka masuulka ah qorshaha daryeelka ay isku racaan in macmiilku aanu u baahnayn adeegyada;**
    - **Macmiilku waa diidi karaa adeegyada, ama doorashada in la wareejiyo ama la fasaxo;**
    - **Bixiyaha adeega ayaa go'aamiya, iyadoo loo eegayo siyaasada uu dejiyay bixiyuhu ee khuseeya ujeedada fasaxa iyo sababta iyo inuu waafaqay shuruudaha waaxdas, in macmiilka (ama dadka kale ee ku sugan guriga macmiilka) dabeecadiisu tahay mid carqalad ah, af lagaado leh ama aan caawimo ku lahayn keenida macmiilka goobta daryeelka ama awooda adeeg bixiyuhu ku hawlgalo ayaa ilaa xad naafo ah. Adeeg bixiyuhu waa inuu sameeyo kuwan soo socda kahor inta aanu fasixin macmiilka:**
        - **La talinta macmiilka, wakiil (hadii uu jiro), dhakhtarka(rada) bixiya dalabaadka qorshaha daryeelka, dhaqtarka macmiilka ee daryeel bixiyaha ama xirfadlayaasha kale ee caafimaadka ee masuulka ka ah bixinta adeegyada iyo daryeelka macmiilka kadib marka uu ka baxo bixiyaha daryeelka caafimaadka (hadii ay jirto) sabab bixitaan oo loo tixgaliyo.**
        - **Samee dadaalo lagu xaliyo dhibaatooyinka habdhaqan ee muujiyay macmiilku, habdhaqanka dadka kale ee jooga guriga macmiilka, ama xaalad.**
        - **Sii macmiilka iyo wakil (hadii ay jiraan), macluumaadka xiriirka ee wakaaladaha kale ama bixiyayaasha daryeel ee awoodi kara inay siiyaan daryeel.**
        - **Diwaangali dhibaatooyinka adigoo samaynaya dadaalo lagu xalinayo dhibaatooyinka, dhexgali qoraalkan diwaanka caafimaad.**
    - **Macmiilka ayaa dhintay.**
    - **Wakaalada daryeelka ayaa joojisay hawsha.**

21. Ugu yaraan 30 cisho ogeysiis ka joojinta adeega daryeel bixiyaha oo lasoo horumariyey, marka laga reebo xaaladaha marka:
    - Helaha adeegyadu ku lugleeyahay fal badalaaya shuruudaha shaqaaleysiinta sida lagu sheegay heshiiska shaqaaleysiinta ee u dhexeeya daryeel bixiyaha guriga iyo shakhsiga bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama abuuraya deegaan shaqo aan amni ahayn ama xadgudub ku ah shakhsiga bixinaya adeegyada daryeelka guriga.
    - Xaalad degdega oo ku timaad daryeel bixiyaha ama isbadel muhiim ka ahayn shuruudaha helaha adeega oo ay ka dhasheen baahiyo adeeg oo ka badan heshiis hada ee adeeg bixiyaha oo aanu si amaan ah u buuxin karin daryeel bixiyaha gurigu; ama
    - Adeeg-bixiyahu aanu helin lacagta adeegyada, taasi oo ugu yaraan toban cisho ka hor ogeysiis joojinta adeega la bixin doono.
22. Wareejin isku-dubbaridan markii isbedel ku dhaco bixiyaha adeegyada.
23. U cabatid shaqaalaha ama akhtiyaarka macmiilka ee adeegyada, **daaweynta ama daryeelka** la bixiyey, ama lagu guul daraystay in la bixiyo, iyo akhlaaq daro ama ixtiraam daro macmiilka loo gaysto ama hantida macmiilka iyo xuquuqda si loogula taliyo isbadalo siyaasadeed iyo adeegyo, oo ka xor ah aargoosi, oo ay ka mid yihiin hanjabaada joojinta adeegyada. **Xuquuqda waxaa lagula talinayaa** Xarunta Warinta Xadgudubka Dadka-Waweyn MN (MAARC), **in ujeedadeedu tahay in la helo cabashooyinka iyo khadka tilifoonka dawladu bilaasha ku bixisay ee daryeelka caafimaadka guriga, xogta lagala xidhiidhayo, saacadaha hawl galada su'aalaha ku sahabsan adeeg bixiyayaasha maxaliga ah.**
24. Ogow sida loola xiriiro shaqsiga bixiyaha daryeelka guriga kaasoo mas'uul ka ah xalinta dhibaatooyinka iyo inuu baaro daryeelka guriga oo isku dayo xalinta cabashada.
25. Ogow magaca iyo cinwaanka iyo lambarada taleefanka ee gobolka ama wakaaladda degmada si aad ugala xiriirto wixii macluumaad dheeri ah ama caawimaad ah **iyo, haddii ay suurogal tahay, hay'adaha ay maalgaliso dowladda dhexe ee ka adeega goobta uu macmiilku deggan yahay.**
26. Xaqiiji xuquuqahan shaqsiyeed, ama ha ku cadeeyo wakiilka macmiilku ama qof kasta oo matalaya macmiilka, ayadoo aysan jirin aargudasho, **kana maran tahay takoor ama aargudasho ku saabsan adeegsiga xuquuqdiisa ama u muujinta cabashooyinka daryeel bixiyaha ama hay'ad kale oo ka baxsan.**
27. **In lagu ogeysiiyo xaquuqda helitaanka kaalmooyinka iyo adeegyada luuqada iyo sida loo helayo adeegyadan.**
28. Ku rid aaladda kormeerka elektiroonigga ah goobta macmiilka ama halka uu degan yahay iyada oo la waafajinayo shuruudaha gobolka.

Waxaad dooran kartaa inaad kala hadasho wixii walaac ah adeeg bixiyaha. Xasuusin ahaan, adeeg bixiyayaasha waxaa looga baahan yahay inay ka shaqeeyaan sidii loo hubin lahaa xuquuqahaaga iyo in shuruudaha loo raacay. Marka adeeg bixiyayaashu ku xadgudbaan xuquuqaha qaybtan, waxaa ka dhalanaya ganaaxyo iyo talaabooyin ka dhan ah liisaanka.

Bixiyeyaashu waa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Dhiirrigeli oo gacan ka geyso fulinta ugu habboon ee xuquuqdan.
- Sii magacyada iyo lambarrada taleefanka shaqsiyaadka iyo ururada sameeya u doodista iyo adeegyada sharciga ee loogu talagalay macaamiisha iyo deganeyaasha doonaya inay caddeeyaan xuquuqdooda.
- Samee dadaal kasta oo aad ku caawinayso macaamiisha ama helitaanka macluumaadka deggeneyaasha ee ku saabsan haddii caymiska dadka waa weyn ee dawlada dhexe, kaalmada caafimaad, barnaamijyada kale ee caafimaad, ama barnaamijyada dadweynaha ay bixin doonaan lacagha adeegyada.
- U samee fududeyn macquul ah dadka naafada ka ah isgaarsiinta, ama kuwa ku hadla luqad aan aheyn Ingiriis.
- Sii dhammaan macluumaadka iyo ogeysiisyada ku qoran luuqad waadax ah iyo shuruudaha macmiilka ama qofka degani uu fahmi karo.

Ma jiro adeeg bixiye u baahan kara ama ka codsan kara macmiil ama degane inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqaha ku taxan qaybtan wakhti kasta ama sabab kasta ha noqotee, oo ay kujirto shuruud ah bilaabida adeegyada ama galida heshiiska caawimaada nolosha.

## Tarjumida iyo Dhaqangelinta Xuquuqaha.

Xuquuqahan waxaa loo aasaasay iyadoo la eegayo faa'idada macaamiisha hela adeegyada daryeelka guriga. Dhammaan bixiyeyaasha daryeelka guriga waa inay u hoggaansamaan xuquuqahaan. Gudoomiyaha ayaa fulin doona tan. Bixiyaha daryeelka gurigu ma weydiisan karo ama umagama baahan karo macmiil inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqahan oo uu shuruud uga dhigo helitaanka adeegyada. Bayaankaan xuquuquhu ma beddeleyo mana yareynayo xuquuqaha kale iyo madax-bannaanida jiri kara marka loo eego macaamiisha heleysa adeegyada daryeelka guriga, dadka bixiya adeegyada daryeelka guriga, ama bixiyeyaasha daryeelka guriga ruqsada haysta.

## Macluumaadka

Waxaad kala xiriiri kartaa daryeel bixiyaha ruqsada leh sidan hoos ku xusan:

Magaca qofka haysta liisanka:____________________

Telefoon:____________________

Iimayl:____________________

Cinwaan:____________________

Magaca iyo jagada qofka dhibaatooyinka ama cabashooyinka loo gudbin karo:__________

____________________

**Gudbi xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaad ama dhiigmiirasho lacageed oo qof weyn oo nugul ah:**

XARUNTA WARBIXINTA XADGUDUBKA DADKA WAAWEYN EE MINNESOTA (MAARC)
Taleefan Lambar: 1-844-880-1574
Wixii macluumaad ee dheeri ah:
Ilaalinta dadka waaweyn ee jilicsan iyo ku xadgudubka (https://mn.gov/dhs/adult-protection/)

**Dhamaan cabashooyinka kale** ee aan looga shakisanayn xadgudub, dayacaad ama ka faa'iideysiga dhaqaale ee qof weyn oo nugul, fadlan la xiriir Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota:

WAAXDA CAAFIMAADKA MINNESOSTA XAFIISKA CABASHOOYINKA CAAFIMAADKA
PO Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970
Taleefan: 651-201-4201 ama 1-800-369-7994
Fax: 651-281-9796
health.ohfc-complaints@state.mn.us Xafiiska Cabashooyinka Caafimaadka
(https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/ohfc/index.html)

Taleefanka khadka tooska ah ee wakaalada caafimaadka guriga la xaqiijiyay ee gobolka
Wixii cabashooyin ah iyo su'aalo ku saabsan HHAs maxalliga ah
Saacadaha shaqada; isniin-jimce , 8:00 a.m. – 4:30 p.m. – Fariin
waad u dhaafi kartaa 24/7 Waaxda Caafimaadka Minnesota
Xafiiska Cabashada Caafimaadka
Tilifoon: 651-201-4201 ama 1-800-369-7994
Fax: 651-281-9796
health.ohfc-complaints@state.mn.us Xafiiska Cabashooyinka Caafimaadka
(https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/ohfc/index.html)

**Si aad u codsatid adeegyada taageerada**, fadlan la xidhiidh Xafiiska Masuulka Cabashooyinka ee Daryeelka Mudada-Dheer ama Xafiiska Masuulka Cabashooyinka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Horumarinta Naafada:

XAFIISKA MASUULKA CABASHOOYINKA
DARYEELKA MUDADA-DHEER
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
1-800-657-3591 or 651-431-2555
Masuulka Cabashooyinka Daryeelka Mudada-Dheer
(http://www.mnaging.org/Advocate/OLTC.aspx)

XAFIISKA MASUULKA CABASHOOYINKA CAAFIMAADKA MASKAXDA IYO HORUMARINTA NAAFADA
121 7th Place East
Metro Square Building
St. Paul, MN 55101-2117
1-800-657-3506 or 651-757-1800
Ombudsman.mhdd@state.mn.us
Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental
Disabilities (https://mn.gov/omhdd/)

XARUNTA CAAWINTA QANUUNKA/SHARCIGA NAAFADA EE MINNESOTA
(Nidaamyada Ilaalinta iyo Taageerada)
430 First Avenue North, Suite 300
Minneapolis, MN 55401-1780
1-800-292-4150
mndlc@mylegalaid.org
Caawimada qanuunka (http://mylegalaid.org/)

QEYBTA ADEEGYADA ARIMAHA BULSHADA MINNESOTA
(Arimaha wax isdaba marinta caawimada
caafimaad iyo xadgudubka lacag bixinta)
Adeegyada dabo galka iyo dib u Eegista Sharafta
PO Box 64982
St Paul, MN 55164-0982
1-800-657-3750 or 651-431-2650
DHS.SIRS@state.mn.us

KHADKA XIDHIIDHKA
(Xarunta Khayraadka D'ada iyo Naafadada/Wakaalada Da'da) Minnesota Board on Aging
PO Box 64976
St. Paul, MN 55155
1-800-333-2433
senior.linkage@state.mn.us
Khadka Xidhiidhka (www.SeniorLinkageLine.com)

XARUMAHA MADAXBANAANI KU NOOLAANSHAHA
Qeybta Horumarinta Shaqaaleysiinta iyo Dhaqaalaha –Si madaxbanaan U-Noolaanshaha (https://mn.gov/deed/job-seekers/disabilities/independent/)
Eeg magacyada wabsaadyada, ciwaanada iyo lambarada tilifoonada.

URURKA HORUMARINTA TAYADA DARYEELKA QOYSKA IYO HELEYAASHA DARYEELKA CAAFIMAAD
Livanta LLC - BFCC-QIO Barnaamijka
10820 Guilford Road, Suite 202
Annapolis Junction, MD 20701-1105
1-888-524-9900, TTY 1-888-985-8775

STRATIS HEALTH
(Ururka Horumarinta Tayada)
2901 Metro Drive, Suite 400
Bloomington, MN 55425-1525
Tilifoon: 952-854-3306
Wicitaan Bilaasha: 1-877-STRATIS (787-2847)
Fax: 952-853-8503
info@stratishealth.org

**Su'aalaha guud, fadlan la xidhiidh:**

Qeybta Caafimaadka Minnesota
Laanta Sharci-fulinta Caafimaadka
85 E. 7th Place
PO Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970
651-201-4101
health.fpc-web@health.state.mn.us
Qeybta Caafimaadk Minnesota (www.health.state.mn.us)

Waxa isticmaalaya daryeel bixiyayaasha Caafimaad sida uu dhigayo Sharciga Minnesota, Qeybta 144A.44, xeer-hoosaadkiisa 1 marka laga reebo luuqada khadka madow ee u taagan xuquuq macmiil oo dheeraad ah oo hoos yimaad sharciga fadaraalka 42CFR 484.50. Xuquuqahani waxay khuseeyaan macaamiisha ka helayaa adeegyo daryeel guri wakaaladaha la ansixiyey ee Daryeelka Caafimaadk kuwaasi oo sidoo kale ah adeeg daryeel bixiyaal liisan haysta oo siiya daryeel caawimo macaamiisha sida oo qayexay 144G.

Daryeel bixiyaha gurigu wuxuu siin doonaa macmiilka ama wakiilka macmiilka ogeysiis qoraala oo xuquuq ah ka hor taariikhda adeegyada la siisyey macmiilka. Daryeel bixiyuhu wuxuu sameyn doonaa dhamaan dadaalada macquulka ah sii uu u siiyo ogeysiiska xuquuqda macmiilka ama wakiilka macmiilka kaas oo ku qoran luuqada macmiilku ama wakiilka macmiiku fahmi karo.

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Qeybta Sharci-dejinta Caafimaadka
P.O. Box 64900
St. Paul, Minnesota 55164-0900
651-201-4101
health.fpc-licensing@state.mn.us

Dib loo eegay Noofambar 2019

*Si aad ugu heshid qaab kale macluumaadkan, wac: 651-201-4101.*